




**GUDDIGA KU-MEEL GAARKA AH EE DOORASHOYINKA
DAWLADDA PUNTLAN EE SOOMAALIYA**



TPEC
2020 Warbixin sanadle ah

January, 2020

“Codkaagu waa Xaqaaga, Waa Mustaqbalkaaga”



Tusmada Warbixinta	
TUSMADA WARBIXINTA.....	ii
KU SAABSAN GKDPL	iii
FARIINTA GUDDOOMIYAHA	iv
GUUD-MAR GUUD	vii
XAYNDAABKA SHARCI EE DOORASHOYINKA.....	1
GUULAHA LA GAARAY	3
HAWLAHA AAN QABSOOMIN	11
CAQABADAHA	12
NATIIJOYINKA UGU MUHIMSANAA 2020.....	13
HAWLQABADYADA QORSHAYSAN 2021	19
BAHWADAAGTA GKDPL	20
GUNAAANAD MAALIYADEEDKA	21
SAWIRADA GKDPL	23



KU SAABSAN GKDPL

Guddiga Ku-meelgaarka ah ee Doorashooyinka Puntland ee saddexaad (GKDPL) waxaa si rasmi ah u ansixiyay Baarlamaanka Puntland 16-kii November 2019, waxayna ku qabteen furitaan rasmi ah xaruntooda bishii December 2019 halkaas oo ay ku soo bandhigeen qorshahooda istiraatiijiyadeed ee 2020-2021 iyo tubta doorashooyinka Dowladaha Hoose. Qorshaha Istiraatiijiga ah waxa uu la jaanqaadayaa mid ka mid ah tiirarka ugu waawayn ee hormarineed ee Dowladda Puntland oo ah daadajinta maamulka iyo Dimuqraadiyeynta Puntland.

Kadib awoodsiintiisa sharci, Guddigu wuxuu dhaqan galiyay waajibaadkii loo igmaday oo ay ka mid ahaayeen diyaarinta, abaabulka iyo kormeerka doorashooyin xor iyo xalaal ah oo ka dhaca deegaannada Puntland iyo usoo gudbinta codbixiyeyaasha natiijada dhabta ee doorashada taasoo ka maran eex iyo wax isdaba maryayn. Guddigu wuxuu u heellan yahay inuu guto waajibaadka loo igmaday iyadoo ay hagayaan mabaadi'da Dimoqraadiyadda sida; Madax-bannaanida, Eex la'aanta, Kawada qayb-qaadashada, Daah-furnaanta iyo Isla-xisaabtanka.

Guddigu wuxuu ka koobantahay sagaal (9) xubnood oo ay hogaaminayaan Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenkiisa, iyadoo loo xil saaray jihaynta siyaasada iyo korjoogtaynta istiraatiijiga ah. Waxay ansixiyaan siyaasadaha, qawaaniinta, xeerarka anshaxa iyo tilmaamaha ku socda xoghaynta. Hawl maalmeedka Guddiga waxaa mas'uul ka ah xoghaynta Guddiga oo uu madax ka yahay Xoghayaha Guud.

Guddiga Ku-meelgaarka ah ee Doorashooyinka Puntland (GKDPL) waxaa loo aasaasay isla markaasna loo igmaday kormeeridda howlaha soo socda:

- (i) Maareynta iyo qabashada doorashada Dawladaha Hoose (LGE)
- (ii) Diiwaangelinta Urur Siyaasadeedyada iyo muwaadiniinta u qalma inay codeeyaan
- (iii) Diiwaangelinta saddexda Urur Siyaasadeed ee ugu horreeya ka dib doorashooyinka Dawladaha Hoose .



FARIINTA GUDDOOMIYAHA



Sanadka 2020 wuxuu ahaa sanad caqabadihiisa iyo fursadihiisa wata, sanad kor u kaca iyo hoos u dhacaba jiray, kumana koobnayn GKDPL oo kaliya, ee sidoo kale waxaa la qabay dhammaan ururada adduunka oo dhan sababo la xiriira cudurka faafa ee Covid-19. Aniga oo ku hadlaya magaca Guddiga ku-meel gaarka ah ee Doorashooyinka Puntland GKDPL, waxaan rabaa inaan ku bilaabo inaan tacsii u diro dhammaan dadkii kuwaayay xanuunkaas saf-marka ah dadkii ay jeclaayeen, waxaan sidoo kale duco u dirayaa kuwa la xanuunsanaya oo aan u rajaynayaa caafmaad dag-dag ah.

Si kastaba ha noqotee, waxaa farxad weyn ah inaan bogaadinayo dhammaan Guddiga, xoghaynta, iyo kooxaha kala duwan ee u adkaystay sannadkan adag, si guul lehna loo fuliyo howlaha kala duwan ee waafaqsanaa Qorshaheenna Istiraatiijiyadeed ee sanadka. Marka laga yimaado caqabadaha uu la yimid caabuqa Covid-19, Guddigu wuxuu awood u yeeshay inuu diyaariyo oo uu bilaabo qorshihiisa istaraatiijiyadeed ee 2019-2020 16 dagmo oo ka ay kamid yihiin; Garoowe, Burtinle, Galkacyo, Galdogob, Dangorayo, Qardho, Dhahar, Badhan, Bosaaso, Baargaal, Carmo, Waaciye, Eyl, Boocame iyo Uffeyn. GKDPL wuxuu si guul leh xafiisyo a uga furtay Degmooyinka Qardho, Eyl iyo Uffeyn si uu u daadajiyo howlaha Guddiga ee gobolladaas. GKDPL wuxuu sidoo kale dhameystiray qorista shaqaalaha muhiimka ah ee xarunta iyo xafiisyada degmooyinka doorashada hordhaca ah, oo ay kujiraan Agaasimayaasha Waaxyaha, Madaxyada Qeybaha, Gudoomiyeyaasha iyo Xoghayeyaasha Degmooyinka doorashooyinka hordhaca ah.

Intaas waxaa sii dheer, GKDPL wuxuu awoodday inuu qiimeeyo, nidaamiyo, hubiyo, caddeeyo isla markaasna tababaro Ururada Siyaasadda ee kaqeybqaadan doona doorashooyinka Dowladaha Hoose ee soo socda. Si taa loo kabo, GKDPL wuxuu bilaabay waxbaridda muwaadiniinta iyo kaqey-galkooda doorashooyinka Dowladaha Hoose, iyagoo la wadaagay faahfaahinta howlaha doorashada inta lagu guda jiray booqashooyinka gobolada iyo degmooyinka guud ahaan Puntland. GKDPL wuxuu kaloo aasaasay shan heer oo habab isku xir ah oo loo adeegsan doono in lagu hubiyo kaqeybgalka wax ku oolka ah ee dhamaan daneeyayaasha geedi socodka dimuqraadiyada



Puntland, iyo sidoo kale isku dubaridka la kulanka deeq bixiyaasha ee ku sugan xarunta wadanka Kenya ee Nairobi kuwaas oo ku amaanay Dawlada Puntland iyo GKDPL dadaalada ay wadaan, kuna dhiiri-geliyay qabashada doorashooyinka Dawladaha Hoose ee hal qof iyo hal cod ah, isla markaana soo bandhigay waxqabadkii ugu muhiimsanaa ee Guddiga, iyo yoolalka iyo howlaha u qorsheysan.

Guddigu wuxuu shirar wadatashi ah laqaatay dadka ku dhaqan deegaannada iyo Gudoomiyayaasha Dagmooyinka la filayo inay ka dhacdaan Doorashooyinka hordhaca ah ee sanadka 2021. Sanadka 2019 wuxuu kudhamaaday iyadoo GKDPL uu soo iibsay adeegyada asaasi u ah si loo hormariyo Nidaamka Diiwaangelinta Cod Bixiyeyaasha.

Markaan garwaaqsaday arimahaas badan ee qabsoomay, waxaan dhihi karaa GKDPL wuxuu ku qanacsanyahay horumarada la sameeyay ee la xiriira Qorshaha Istiraatiijiyadeed iyo tubta Doorashooyinka waxaana si buuxda diyaar ugu nahay in aan ku dhaqaaqno doorashooyinka Dawladaha Hoose ee 2021. Waxaan rabaa inaan fursaddan uga faa'iideysto si aan ugu mahadnaqo Dawladda Puntland iyo Wasaaradaha, Waaxaha iyo Hay'adaha ay khusayso hawlahaan iyo madaxdooda oo rabitaankooda siyaasadeed uu fududeeyey dadaallada GKDPL ay ku diyaarinayaan doorashooyinka Dawlada Hoose ee 2021. Waxaan sidoo kale rabaa inaan umahadceliyo dhamaan Ururada Siyaasadda ee kaqeybqaatay dhamaan heerarka kala duwanaa sida qiimeynta, Xeerar-samaynta, xaqiijinta, shahaado siinta, iyo tababaridda, waxaana urajeynayaa nasiib wacan doorashooyinka soo aaddan. Doorka ay ka ciyaareen Ururada Bulshada Rayidka ah iyo Warbaahintu ma ahan mid la ilaawi karo, waxay awoodeen inay xoojiyaan farriintayada dimuqraadiyadda ee gobollada Puntland oo dhan. Waxaan sidoo kale rabaa inaan u mahadceliyo deeq bixiyaasha nagu taageeray howlaha aan wadno guud ahaan si aan ugu diyaar garowno doorashooyinka soo socda. Dadweynaha guud ahaan, waxaan rabaa inaan uga mahadceliyo taageerada joogtada ah iyo xamaasadda ay u muujiyeen geeddi-socodka dimuqraadiyadda Puntland.

Sanadka 2021, anagoo u diyaar garoobayna doorashada Dawlaha Hoose, iyo iyadoo la raacayo Tubta Doorashooyinka iyo Qorshaha Istiraatiijiyadeed, GKDPL waxay dhamaystiri doonaa hawlaha muhiimka ah sida; dhamaystirka kala xadaynta xuduudaha deegaan doorashooyinka, qabashada diiwaangelinta codbixiyeyaasha ee goboladda Puntland oo dhan, sii-wadidda ka



"Your Vote, Your Right, Your Future"

qaybgalinta muwaaddiniinta iyo wacyigelinta codbixiyayaasha, qabashada doorashooyinka hordha ah ee degmooyinka la soo xulay, u diyaargarowga doorashooyinka guud ee degmooyinka iyo abaabulka, kormeerka iyo ka warbixinta natiijooyinka doorashooyinka Dawladaha Hoose.

Wabillaahi Tawfiiq.

Guuleed Saalax Barre

Guddoomiyaha GDKPL



GUUD-MAR GUUD

GKDPL wuxuu diyaariyay soona bandhigay Qorshihiisa Istiraatiijiyadeed ee 2019-2021 bishii December 2019. Kadib waxaa laga bilaabay dhammaan degmooyinka la booqday (16) oo ay kujiraan; Garoowe, Burtinle, Galkacyo, Galdogob, Dangorayo, Qardho, Dhahar, Badhan, Bosaaso, Baargaal Carmo, Waaciye, Eyl, Boocame iyo Uffeyn. GKDPL wuxuu si guul leh xafiisyo uga furtay Degmooyinka Qardho, Eyl iyo Uffeyn. Wuxuu sidoo kale Guddigu soo gabagabeeyay qorista shaqaalaha muhiimka ah ee xarunta dhexe iyo degmooyinka loo asteeyay doorashooyinka hordhaca ah. GKDPL oo kaashanaya Xarunta Cilmi Baarista iyo Horumarinta Puntland (PDRC) ayaa soo qabanqaabiyay aqoon isweydaarsi soconayay laba maalmood oo loo qabtay Ururada Siyaasadeed ee dhawaan la diiwaan-galiyay.

GKDPL wuxuu sameysay daraasad iyo dib u eegis lagu sameeyay qaabdhismeedka shuruuca doorashooyinka ee jira. GKDPL wuxuu kaloo diyaariyay qabyo qoraalka Hindise Sharciyeedka Diiwaangelinta Cod-bixiyaha. GKDPL wuxuu bilaabay waxbarista muwaadiniinta iyo laylinta kaqaybqaadashada muwaadinimo. GKDPL wuxuu dejiyay shan heer oo isku xir ah oo loo isticmaali doono in lagu hubiyo kaqaybgalka wax ku ool ah ee dhammaan daneeyayaasha. Guddoomiyaha GKDPL ayaa kula kulmay magaalada Nairobi deeq-bixiyayaasha wuxuuna soo bandhigay waxqabadka muhiimka ah ee Guddiga, yoolalka iyo howlaha u qorsheysan. Guddigu wuxuu warbixin ka siiyay xubnaha Bulshada Rayidka horumarka laga sameeyay diyaargarowga doorashada waxayna ka codsadeen taageeradooda iyo wax ku biirintooda, wacyigelinta iyo ka qaybgalka shacabka.

Guddigu waxay sidoo kale kulamo la tashiyo ah laqaateen dadka deegaanka iyo Guddoomiyayaasha dagmooyinka, waxayna kala hadleen suurtagalnimada in doorasho la qabto horaanta sanadka 2021. GKDPL waxay soo bandhigeen qandaraaska nidaamka diiwaangelinta codbixiyayaasha, waana la dhameystiray, shirkada ku guulaysatay qandaraaska waxay ku keeni doontaa nidaamka iyo qalabka 60 maalmood gudohood laga bilaabo 1-da December 2020.

U-wareegidda xarun dhexe oo cusub ma aanay suura galin sababo la xiriira dib-u-dhac ku yimid hawlaha diyaarinta xarunta cusub. Soo iibinta iyo diyaarinta qalabka xafiisyada iyo nidaamyada kale waxaa qeyb ahaan kaliya laga hirgaliyay saddex degmo oo dhawaan ay kadhici doonaan doorashooyinka hordhaca ah, deegaanada kale laguma guulausan in laga hirgaliyo sabab la



xiriirta caabuqa Covid -19 iyo dhaqaalaha oo aad u yaraa. abaabulidda safaro waxbarasho iyo is-waydaarsi aqooneed ma aanay suura galin sababo la xiriira cudurka saf-mareenka ah ee covid-19 kaasoo xadiday safaradii gobolada oo dhan. Soo iibinta Agabka Isgaarsiinta Tiknolojiyadda (ICT), softiweerka qalabka kombuyuutarada iyo internet-ka ee xafiisyada degmooyinka gobollada dhexe lama hirgelin dhaqaale la'aan awgeed. Ansixinta "siyaasada kawada qaybgalka Jinsiga" lama samayn maxaa yeelay waxaa yaraaday lacagihii lagu shaqaalayn lahaa la-taliyayaal si ay u fuliyaan dib u eegista, horumarinta iyo hirgalinta siyaasadda. GKDPL wuxuu sanadka 2021 mudnaanta koowaad siin doonaa arimahaas, waxayna kala shaqeyn doonaan bahwadaagta ka taageeri kara arimahaas. Sababo la xiriira caabuqa covid-19 iyo dhaqaale yare awgeed, waxaa suuragali wayay hirgalinta uqaabilsanaha GSI-ga ee Xafiiska Dhexe.

Bilaabasha cudurka faafa ee 'Covid-19' wuxuu keenay inta badan howlaha GKDPL ay adkaato in la fuliyo sababo la xiriira caqabado aan horay loo arag oo ay ka mid yihiin xayiraadaha safarka, bandooga, karantiilinta, kala fageynta bulshada iyo tallaabooyinka kale ee ka hortagga ah ee nagu qasbay hawlo badan oo muhiim ah inay qabashadoodu qaadata toddobaadyo. Yaraanta dhaqaalihii lagu maalgalin lahaa qaar ka mid ah hawlaha muhiimka ah ee GKDPL ayaa sababay dib u dhac ku yimid qaar ka mid ah hawlaha GKDPL ee ku xusan Qorshaha Istaraatiijiga ah iyo tubta Doorashooyinka.

In kasta oo caqabadahaasi jireen, haddana GKDPL waxay horumar la taaban karo ka samaysay dhinacyo badan oo muhiimka ah. waxyaabihii ugu muhiimsanaa ee sanadka 2020 qabsoomay waxaa ka mid ahaa; la fal galka bulshada, kobcinta aqoonta muwaadinka, xoojinta kalsoonida shacabka iyo dadwaynaha, kobcinta ka qaybgalka Dhalinyarada iyo Haweenka, xoojinta isku xirka daneeyayaasha, dukumiintiyada kala duwan oo la soo saaray, qiimeynta karaanka degmooyinka, dhameystirka kala sooca xuduudaha degmooyinka loo asteeyay doorashooyinka hordhaca ah iyo ku dhawaaqista iyo shahaada siinta Ururada siyaasadda.

Iyadoo la raacayo qorshaha Istaraatiijiyadeed iyo Tubta Doorashooyinka Dawladaha Hoose, GKDPL wuxuu hirgelin doonaa howlaha soo socda ee la qorsheeyay sannadka 2021: sii-wadidda ka qaybgalka muwaaddiniinta iyo wacyigelinta cod-bixiyaha, dhammaystirka kala-xadaynta



xuduudaha degmooyinka doorashooyinka, ansixinta hindise-sharciyeedka diiwaangelinta cod-bixiyeyaasha iyo horumarinta Qaab dhismeedka sharciga doorashada, bilaabida iyo dhameystirka howsha diiwaangelinta codbixiyaasha, dhameystirka iyo qabashada doorashooyinka hordhaca ah ee 3 degmo, abaabulidda, kormeeridda iyo ka warbixinta natiijooyinka doorashooyinka Dowladaha Hoose iyo qabashada doorashooyinka Golayaasha Deegaanka.

XAYNDAABKA SHARCI EE DOORASHOYINKA

Xeerarka hagaya diwaangelinta codbixiyaasha iyo doorashooyinka dowladaha hoose ee Dawladda Puntland waxaa kamid ah:

1. Dastuurka Dawladda Puntland ee Soomaaliya;
2. Xeerka Golayaasha Deegaanka ee Dawladda hoose ee Puntland;
3. Sharciga Guddiga Doorashooyinka Puntland;
4. Sharciga Doorashada Goleyaasha Deegaanka ee Puntland;
5. Sharciga Xisbiyada iyo Ururrada Siyaasadeed ee Puntland;
6. Sharciga Diiwaangelinta Cod-bixiyaha (waa qabyo qoraal hadda horyaal Golaha Wasiirrada Puntland).

Marka laga yimaado agabkaas Sharci, waxaa jira hagayaal iyo xeer-hoosaadyo dhawr ah kuwaas oo GKDPL uu diyaarinayo si ay uga caawiyaan howlaha doorashooyinka, iyo sidii ay ugu diyaar garoobi lahaayeen doorashooyinka Dowladaha Hoose ee soo socda, waxaana kamid ah:

1. **Xeerarka Anshaxa:** GDKPL wuxuu horumarin doonaa xeerarka anshaxa ee nidaamka diiwaangelinta cod-bixiyaha iyo hannaanka Doorashooyinka hordhaca ah ee Golayaasha Deegaanka, waxaana jiri doona xeerar kala duwan oo anshaxeed una gaar ah Ururada Siyaasadda iyo Saxaafadda.
2. **Habka Xallinta Khilaafaadka:** habka xallinta khilaafaadka wuxuu la socon doonaa xayndaabka Sharci, wuxuuna noqon doonaa nidaamka uu GDKPL u adeegsado qabashada dhammaan cabashooyinka la soo gudbiyo xilliga diiwaangelinta codbixiyeyaasha iyo Doorashada.



3. **Hagaha Ka-qaybgalinta Jinsiga:** GDKPL waxaa ka go'an inuu abuurdo fursado loo simanyahay iyo inuu dhiiri-galiyo kaqeybgalka haweenka ee hawlaha Doorashada, sidaa awgeed Guddigu wuxuu horumarin doonaa tilmaamo lagu hagayo isla markaasna lagu dhiirigalinayo kaqeybgalka Haweenka.
4. **Hagaha Waxbarista Codbixiyaha:** Waxbarashada cod-bixiyeyaashu waa mid ka mid ah tabaha ugu muhiimsan ee lagu hubin karo in qof kastaa uu ka qaybqaadan karo geeddi-socodka doorashooyinka qof walbana uu xog ogaal u yahay xuquuqdiisa iyo waajibaadkiisa.
5. **Hagaha Korjoogayaasha Doorashooyinka:** Korjoogtooyinka doorashooyinka ee maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah, waxay kormeeraan hannaanka doorashada, waxayna gacan ka geystaan sidii loo hubin lahaa kalsoonida iyo sharcinimada Doorashooyinka. Warbixintooda iyo indha-indhayntoodu sidoo kale waxay noqon kartaa tab muhiim u ah yaraynta khilaafaadka xilliga Doorashada kadib.
6. **Hagaha Diiwaangelinta Cod-bixiyeyaasha iyo Habraacyada Doorashooyinka hordhaca ah ee Golaha Deegaanka:** Ugu dambayn, diiwaangelinta Cod-bixiyaha iyo geeddi-socodka Habraacyada Doorashooyinka hordhaca ah ee Golaha Deegaanka waxay u baahan doonaan qorista boqollaal shaqaale ah oo ay tahay inay raacaan una hogaansamaan siyaasado iyo habraacyo isku mid ah.



GUULAHA LA GAARAY

1.1 Horumarinta Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee GDKPL (2019 -2021)

GDKPL waxaa loo igmaday (i) Maareynta iyo qabashada Doorashooyinka Dawladaha Hoose; (ii) Diiwaangelinta Ururada Siyaasadda iyo Muwaadiniinta u qalma inay codeeyaan iyo (iii) Diiwaangelinta saddexda Urur Siyaasadeed ee ku soo baxa doorashada Dawlaha Hoose. Si loo xaqiijiyo shaqooyinka Guddiga loo igmaday, GDKPL wuxuu diyaariyay oo billaabay qorshahaha Istaraatiijiyadeed ee 2019-2021 (SP) kaasoo hagi doona sameynta tubta doorashooyinka si loogu maamulo looguna maareeyo xiliga ku-mee-gaarka ah sidoo kale wuxuu ka qayb qaadanaayaa xaqiijinta Doorashooyinka guud ee Puntland. Qorshaha Istaraatiijiyadeed ayaa naqshad ahaan loo qaabeeyey: (i) inuu hago isla markaasna maareeyo hawlaha doorashooyinka Dawladaha Hoose ee ku-meel gaarka ah ee Puntland, (ii) Xoojiyo tayada Guddiga lagana dhigo hay'ad lagu kalsoonaan karo iyo (iii) Ka qayb qaato xaqiijinta codbixin guud ee doorashooyinka Puntland ka dhici doona.

1.2 Daahfurka Hawlaha Doorashooyinka ee Gobollada iyo Degmooyinka

Si loo balaariyo howlaha iyo ujeedooyinka GKDPL guud ahaan Puntland, Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee GKDPL iyo Tubta Doorashada ayaa laga bilaabay dhammaan degmooyinka la booqday (16) oo ay ka mid ahaayeen; Garoowe, Burtinle, Galkacyo, Galdogob, Dangorayo, Qardho, Dhahar, Badhan, Bosaaso, Baargaal Carmo, Waaciye, Eyl, Boocame iyo Uffeyn. Daahfurkaani wuxuu dadka reer Puntland fursad u siiyay inay fahmaan yoolalka, mudnaanta, iyo jadwalka Doorashada ee doorashooyinka Dawladaha Hoose ee Puntland. Hawlwadeennada Guddiga ayaa qeybiyay kalandaro ay ku daabacyihiin jadwalka xiliga Doorashada, si cadna u tilmaamaya waxa la qaban doono, goorta la qaban doono iyo cidda ay tahay in laga qeyb galiyo ilaa Maalinta Doorashada.

1.3 Furitaanka Xafiisyada GDKPL ee Degmooyinka Loo asteeyay Doorashooyinka Hordhaca ah

GDKPL waxay si guul leh xafiisyadooda uga furtay Degmooyinka Qardho, Eyl iyo Ufayn. Xafiisyadaas ayaa loo furay si loo daadajiyo hawlaha iyo waxqabadyada GKDPL ee goboladaas, isla markaasna kor loogu qaadayo fududeynta howlaha GKDPL ee heer degmo sidaasna ay ugu baahiyaan adeegyadooda bulshada deegaanka. Qaar ka mid ah adeegyada muhiimka ah ee GDKPL



uu rabo inuu gaarsiiso degmooyinkaas waxaa ka mid ah; wacyigalinta codbixiyaasha, ka qeyb qaadashada shacabka iyo qeybinta agabka Doorashooyinka.

1.4 Qaadashada shaqaalaha muhiimka ah ee GKDPL

GKMPL wuxuu soo gabagabeeyay qorista shaqaalaha muhiimka ah ee xarunta iyo xafiisyada degmooyinka loo asteeyay Doorashooyinka hordhac ah. Waxaa ka mid ah shaqalahaas; agaasime waaxeedyada, madaxyada qaybaha, guddoomiyeyaasha iyo xoghayeyaasha degmooyinka doorashada. Si loo sii fududeeyo howlaha ka socda xafiisyada baahinta, GKDPL waxay qaateen shaqaalaha muhiimka u ah hogaaminta hawlaha GKDPL iyo howlaha kale ee diyaarinta Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka ee degmooyinka loo asteeyay doorashooyinka hordhaca ah, waxayna sidoo kale ku xoojisay shaqaalaheeda xarunta dhexe shaqaale kale oo muhiim ah si loo kordhiyo waxqabadka iyo wax soo saarka howlaha xarunta.

1.5 Xeer u-samaynta Ururada Siyaasadda

Iyagoo tix-raacaya Sharciga Guddiga Doorashooyinka Puntland gaar ahaan Qodobka 8 (15, 16, 17, 18 iyo 19), GKDPL wuxuu nidaamiyay Ururada Siyaasadda iyo xisbiyada ka jira Puntland. GKDPL wuxuu sidoo kale sameeyay qiimeyn si loo hubiyo in qaab dhismeedka sharciga uu u ogolaanayo dhamaan Xisbiyada Siyaasadda, Ururada iyo Musharixiinta inay ku tartamaan Doorashooyinka Golaha Deegaanka iyadoo lagu salaynayo sinnaan iyo caddaalad. Sidaas awgeed, musharixiinta doonaya xilka, waa in loo oggolaadaa inay u tartamaan qaab murashaxiin xisbi ama urur ahaan. Qorshahooda Istaraatiijiyadeed iyo Tubta Doorashooyinka, GKDPL wuxuu fuliyay hawlaha diiwaangelinta oo dhammaystiran oo uu ku sameeyeen Urur siyaasadeedyada oo hada diyaar u ah inay ka qaybgalaan Doorashooyinka soo socda ee Puntland. GKDPL wuxuu furay hawshii diiwaangelinta ee Urur Siyaasadeedyada 14-kii March 2019. Wajigii koowaad ee hawlaha diiwaangelinta ayaa si guul leh ku soo gabagaboobay 15-kii March 2020 halkaasoo Toddoba iyo Toban (17) Ururro siyaasadeed ay si guul ah uga gudbeen wejigii hore ee diiwaangelinta waxaana la siiyay diiwaangelin ku meel gaar ah. Xilliga ugu dembeeyay ee kama dambaysta ahayd wuxuu ahaa 15-ka March 2020, laakiin sababo la xiriira dillaaca caabuqa COVID-19, ayaa waqtiga loo kordhiyay illaa 22-ka July 2020. Liiska ugu dambeeya ee Ururada Siyaasadeedyada ee la kala-soocay ee buuxiya dhammaan shuruudaha ayaa lagu dhawaaqay Toddobaadkii 1aad ee Ogosto 2020.



1.6 Hubinta Urur Siyaasadeedyada

Laga soo bilaabo 1-15 Luulyo, GKDPL wuxuu booqday dhammaan sagaalka gobal ee Dawladda Puntland si uu u kormeero xafiisyada Ururada siyaasadeedyada ee ku-meelgaarka ah ee dhawaan la furay. Muddadaas, Guddigu wuxuu kormeeray in kabadan 80 xafiis, wuxuuna ka buuxiyay foomamka qiimeynta, wuxuuna kaga saxiixay isla goobta si kor loogu qaado furfurnaanta iyo daah-furnaanta. Booqashooyinkii kormeerka ka dib, laga bilaabo 2-22 Luulyo, Guddiga wacay in ka badan 26,000 oo taageerayaasha Ururrada Siyaasadda ah si ay u xaqiijiyaan inay taageeradooda Urur Siyaasadeedyada la diiwaan-gashay. Wicitaanada taleefanka waxaa sabab u ahaa caabuqa Covid-19 taas oo ka dhigtay mid aan suragalayn in loo booqdo shaqsi ahaan. wicitaanadaan waxay sidoo kale lagu xaqiijiyay in taageerayaashu aanay taageerin wax ka badan hal Urur Siyaasadeed, wuxuu sidoo kale Guddigu hubinayay da'da iyo goobaha ay ku suganyihiin taageerayaasha Ururada Siyaasadda, GKDPL wuxuu sidoo kale u kuur galay shirarka guud ee Urur kasta oo siyaasadeed oo si kumeelgaar ah u diiwaan-gashan, sida uu qabo Sharciga Puntland. Kadib wuxuu Guddigu isku daray dhamaan natiijooyinkii iyo dukumiintiyadii ay soo gudbiyeen Ururada Siyaasadda si loo xaqiijiyo hadii ay buuxiyeen shuruudihii sharci ee looga baahnaa.

1.7 Tababarka Jihayn Urur Siyaasadeedyada ee la diiwan-gashay

18-19 Ogosto GKDPL, oo kaashanaysa Xarunta Cilmi Baarista iyo Horumarinta Puntland (PDRC) ayaa soo qabanqaabiyay aqoon isweydaarsi socday laba maalmood oo loo qabtay Ururada Siyaasadeedyada dhawaan la diiwaan-gashay. Aqoon isweydaarsiga waxaa ka soo qayb galay 50 kaqeybgalayaal ah oo ka socda fulinta dhamaan Ururada Siyaasadda. Ujeeddada aqoon isweydaarsiga ayaa ahayd sidii loo balaarin lahaa aqoonta ururadaan ee ku aaddan qaabka ay u shaqeeyaan Ururada Siyaasaddu, iyo shuruucda hagaysa shaqadooda. Kalfadhiyadii kala duwanaa (sida hoos ku taxan) waxay abuureen doodo fara badan mudadaas labada maalmood ah.



Waxaa jiray bandhigyo aqoon isweydaarsi, oo ay ka mid ahaayeen:

1. Taariikhda Xisbiyada Siyaasadeed ee Soomaaliya lixdameeyadii - Waxaa soo jeediyay Axmed Cabaas oo ka socda PDRC
2. Xisbiyada Siyaasadda ee Dhismaha Federaalka - Waxaa soo jeediyay Cabdiqaadir Yuusuf oo ka socda MAX Planck foundation
3. Dulmarka Qaab-dhismeedka Sharci ee Puntland - Waxaa soo jeediyay Cabdirisaaq Axmed oo ka socda TPEC
4. Wareegga Doorashada ee doorashooyinka Golaha Deegaanka ee Puntland - Waxaa soo jeediyay Xasan Ciise Sharmaarke oo ka socda Hay'adda Interpeace
5. Ka Qaybgalka Haweenka ee Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka - Waxaa soo jeediyay Aamina Maxamad oo ka socda PDRC

1.8 Xayndaabka Sharci ee Doorashooyinka

GDKPL wuxuu cilmi-baaris iyo dib-u-eegis ku sameysay qaab dhismeedka sharci ee doorashooyinka. Guddigu wuxuu kaloo diyaariyay Hindise Sharciyeedka Diiwaangelinta Cod-bixiyaha. Hindise-sharciyeedkaas ayaa waxaa loo sameeyay wadatashi lala yeeshay dhammaan daneeyayaasha hannaanka dimuqraadiyeynta Puntland oo ay ka mid yihiin; Ururada Siyaasadda ee diiwaan-gashan, Ururada Bulshada Rayidka ah iyo Hay'aha Dawladda. Hindise sharciyeedka waxaa loo gudbiyay Golaha Wasiiradda ee Dawladda Puntland si ay u ansixiyaan ka hor inta aanu Baarlamaanka u gudbin. Hindise sharciyeedka ayaa dajiyay habka diiwaan-gelinta codbixiyayaasha oo ay ku jiraan siyaasadaha iyo habraacyada la raacayo inta lagu guda jiro hawlaha diiwaangelinta cod-bixiyaha iyo sidoo kale wacyigalinta cod-bixiyayaasha iyo ololaha gaarsiinta dadweynaha si loo hubiyo fahamka baahsan ee cod-bixiyayaasha ee geeddi-socodka dimuqraadiyadda.



1.9 Horumarinta Hagayaasha Xallinta Khilaafaadka Doorashooyinka

Soo saarista hagayaasha xallinta khilaafaadka ka dhasha doorashooyinka ayaa lagu soo gabagabeeyay wadatashi lala yeeshay Dawladda, Ururada Siyaasadda iyo Ururada Bulshada Rayidka ah. Hagayaashan ayaa noqon doona kuwa aad muhiim u ah isla markaasna lagu maarayn doono cabashooyinka iyo khilaafaadka doorashooyinka inta lagu jiro iyo ka dib Doorashooyinka iyada oo la raacayo qaab-dhismeedka sharciga Doorashooyinka.

1.10 Ololaha Wacyigalinta Codeeyayaasha

GKDPL wuxuu bilaabay Ololaha Wacyigalinta Codeeyayaasha ee Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka intii ay booqashooyinka ku marayeen gobolada iyo degmooyinka Puntland guud ahaan. Guddigu wuxuu kulamo dhawr ah la yeeshay daneeyayaasha kaladuwan ee doorashooyinka sida Dhalinyarada, Haweenka, Culimada, Madax-dhaqameedka iyo Ardayda Jaamacadaha halkaas oo xubnaha GKDPL ay kula wadaagayeen macluumaadka doorashada iyo nidaamka loo mari doono sidii loo gaari lahaa doorasho maxali ah oo xor iyo xalaal ah. Guddiga ayaa Ardayda jaamacadaha ku booriyay isla markaasna ku dhiiri-galiyay inay noqdaan danjireyaasha geedi socodka dimuqraadiyeynta Puntland iyo inay waxbaran qaybaha kale ee bulshada gaar ahaan kuwa ku dhaqan dhulka Miyiga. Guddigu wuxuu sidoo kale wadahadallo furan la yeeshay daneeyayaasha doorashooyinka ee kala gadisan halkaasoo kaqeybgalayaasha lagu soo dhaweeyay si ay u weydiiyaan su'aalo furan, una soo bandhigaan talooyin una muujiyaan fikradahooda. Wadahadaladaas ayaa waxaa diirada lagu saaray qodob muhiim ah oo laxiriira talaabooyinka kaladuwan ee doorashooyinka oo ay kamid yihiin dhisidda Maxkamadda Dastuuriga ah iyo kala xadaynta degmooyinka Puntland.

GKDPL wuxuu dadkii uu la kulmay ka helay talooyin iyo fikrado wax ku ool ah, wuxuuna u adeegsan doono fulinta doorashooyinka Golaha Deegaanka ee la qorsheenayo dabayaaqada 2021 iyo sidoo kale doorashooyinka hordhaca ah ee Juun 2021.

Haweenka iyo Dhalinyarada ayaa si gaar ah kor loogu qaaday aqoontooda, ka qayb-qaadashadooda iyo kamid ahaanshohoda doorashada Puntland ee hal qof iyo hal cod. Guud ahaan, GKDPL waxay awood u yeeshen inay si toos ah ula xiriireen 25,000 oo qof oo ka kala yimid 9-ka Gobol ee Puntland, waxayna sidoo kale si dadban ula xiriireen in ka badan 300,000 oo muwaadiniin iyadoo



loo marayo Baraha Bulshada iyo farriimo diyaarsan oo siyaabo kala duwan loogu faafiyey.

1.11 Asaasidda Farsamooyinka Isku –xirka Daneeyayaasha

GKDPL wuxuu dhisay 5 heer oo farsamooyin isku-xir ah oo loo adeegsan doono in lagu hubiyo ka qeybgalka wax-ku-oolka ah ee dhammaan daneeyayaasha, isla markaana lagu wadaago hadba wixii soo kordha, loogana tashado arrimaha dimuqraadiyadda iyo daahfurnaanta, iyo wax yaabaha la halmaala. Farsamooyinkani waxay xaqiijinayaan usinnaanta ka qaybqaadashada, isla xisaabtanka iyo hufnaanta, iyo iskaashiga iyo xiriirka ka dhexeeyaa daneeyayaasha dimuqraadiyadda ee kala duwan. Shantaan heer waxa ay kala yihiin:

- (i) Shirarka isku-xirka billaha ah ee lala yeesho Ururrada Bulsha Rayidka ah.
- (ii) Shirarka isku-xirka billaha ah ee lala yeesho Guddi-hawleedka Golaha Wasiirrada.
- (iii) Shirarka isku-xirka billaha ah ee lala yeesho Ururrada Siyaasadda.
- (iv) Shirarka isku-xirka ee saddex-biloodlaha ah ee lala yeesho deeq bixiyayaasha, iyo
- (v) Shirarka isku-xirka ee saddex-biloodlaha ah ee lala yeesho dhammaan daneeyayaasha.

Nidaamka isku-xirku waxa uu: (i) hagaajiyay isku-xirnaanta u dhexeeya Ururrada Bulshada Rayidka ah iyo GKDPL taas oo xoojinaysa dadaallada abaabulidda bulshada ee la xiriira isbeddelka hab-dhaqanka iyadoo loo marayo waxbarashada asxaabta, baraarujinta dimuqraadiyadda iyo xuquuqdaha. (ii) Xoojiyay isku-xirnaanta u dhexaysa Guddi-hawleedka Golaha Wasiirrada iyo GKDPL taas oo kordhinaysa ka go'naansha siyaasadeed iyo taageerada laga helaayo dhanka Dowladda.

(iv) Xoojiyay xiriirka dhammaan daneeyayaasha taas oo u oggolaaneysa guddiga inuu helo macluumaad lagu kalsoonaan karo, kor u qaadista daahfurnaanta, kobcinta wax-ku-oolnimada hawlgalka iyo inuu siiyo war-celin dhammaan daneeyayaasha ay khuseyso iyo (iv) Hagaajiyay abaabulka ilaha-dhaqaale ee deeq bixiyayaasha kala duwan ee horumarinta dimuqraadiyadda.

1.12 La-macaamilka Deeq-bixiyayaasha

Intii u dhaxaysay Febraayo – November 2020, Guddiga ayaa kula kulmay magaalada Nairobi deeq-bixiyayaasha wuxuuna u soo bandhigay guulaha ugu mugga weyn ee Guddiga, yoolalka, iyo



howlaha u qorsheysan. Deeq-bixiyeyaashu waxa ay dhiirrigeliyeen dadaalada dowladda Puntland iyo GKDPL ay ku doonayeen in ay qabtaan doorashooyin hal qof iyo hal cod ah oo ka dhacda dawladdaha hoose. Kulankan ayaa waxaa ka soo qeyb galay Midowga Yurub, USA, Germany Sweden, Switzerland, Denmark, Interpeace, SAHAN iyo Sanduuqa Xassiloonida Soomaaliya (Somali Stability Fund). Guddiga ayaa sidoo kale shir doceedyo laqaatay deeq bixiyaasha halkaas oo dhammaan dhinacyadu isku raaceen in lasii wado taageeridda wadiiqada puntland ee hal qof iyo hal cod.

1.13 Kullammada Urrurada Siyaasadda iyo Bulshada Rayidka ee Billaha ah

6dii Sebtember GKDPL waxay qabteen kulammada billaha ah ee lala yeelanaayo Urrurada Bulshada kiisii ugu horreeyey muddo afar bilood ah sababo la xiriira caabuqa Covid-19 aawadiis. Guddigu wuxuu warbixin ka siiyay xubnaha bulshada rayidka horumarka laga sameeyay dhanka u diyaargarowga doorashada waxayna ka codsadeen taageeradooda iyo wax ku biirintooda ee dhanka wacyigalinta iyo ka qayb qaadashada shacabka. Xubnaha bulshada rayidka ah, oo ay horkacayaan Daneeyayasha aan dawliga ahayn ee Puntland (PUNSAA), waxay isku xilqaameen wacyigelinta bulshada iyada oo loo marayo fagaarayaasha iyo wadaagista farriimaha muhiimka ah. Ka qaybgalayaashu waxay kaloo isku raaceen ahmiyadda ay leedahay horumarinta hagaha waxbaridda cod-bixiyaha iyo buug-gacmeed si loo hubiyo in macluumaad sax ah la siiyo muwaadiniinta reer Puntland. Ugu dambayntii, jaamacadaha iyo machadyada cilmi baarista waxay kaloo ballanqaadeen inay taageerayaan qabashada shirar ay la yeeshaan ardayda jaamacadaha si loo horumariyo fahamkooda meertada Doorashada Dowladdaha Hoose ee Puntland. GKDPL waxuu sidoo kale kulankiisii ugu horeeyey ee billaha ah la yeeshay ururrada siyaasada si ay ugala hadlaan arrimaha hortabinta leh isla markaana loo maqlo tabashooyinka iyo talooyinka ururrada siyaasada.

1.14 Wadatashiyada Doorashooyinka Hordhaca ah

Guddigu waxa ay kulammo wadatashi ah oo ku saabsan qummanaanta doorashooyinka hordhaca ah ee 2021 la qaateen dadka deegaanka iyo Guddoomiyeyaasha Degmooyinka. Ujeeddada qabashada wadatashiyadan waxay ahayd in GKDPL uu isla meel dhigaan shuruudaha lagu soo xulayo 3-da degmo ee ugu habboon ee doorashooyinka hordhaca ah lagu qaban doono. La-tashiyo



badan ka dib, GKDPL waxuu dejiyey shuruudaha soo socda ee astaynta degmooyinka hordhaca ah ee laga qaban doono doorashooyinka hordhaca ah sida ku cad jadwalka hoose;

Jadwalka 1-aad: Muujinta shuruudaha loo adeegsaday astaynta 3 degmo ee hordhaca ah

Shuruudaha
1. Degmadu waa inay lahaato xasilooni ku filan oo u oggolaanaysa isu imaatinka dadweynaha ee xorta ah si ay u codeeyaan.
2. Degmadu waa in ay lahaato amni xuduudeed oo waafi ah oo lagaga hortagi karo dhalan-rogidda cod bixiyayaasha
3. Saddexda degmo waa in aysan ku oollayn hal gobol balse ay ku kala yaallaan gobollo kala duwan.
4. Saddexda degmo waa inay lahaadaan jiritaan siyaasadeed iyo mid deegaan oo kala duwan si loo helo jaangooyo wax ku ool ah. Tusaale ahaan, degmo in ay noqoto degmo aad loogu badan yahay, degmo kalena ay dhacdo gobollada xeebta iyo saddexaadna ay tahay gobollada reer guuraaga ah.
5. Degmadu waa in ay leedahay dad badan oo deegaankeeda ah oo danaynaaya in ay ka qayb qaataan doorashooyinka hordhaca ah.

1.15 Soo-iibsiga Nidaamka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

6-dii October, GKDPL wuxuu soo bandhigay qandaraaska nidaamka diiwaangelinta cod-bixiyayaasha. Tartanku wuxuu u furanaa dhammaan shirkadaha maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah. Shirkadahii daneynaayey waxay soo gudbiyeen soo jeedintooda ku saabsan qalabka, hardweerka, iyo softiweerka bishii Nofeembar 2020 ka dib faahfaahinta iyo dukumiintiyada qandaraaska ee ay GKDPL ku daabacday <https://tpec.pl.so/jobs-and-announcements/>

Soo iibinta aaladda nidaamka diiwaangelin codbixiyayaasha waa lasoo gabgabeeyey, iyadoo loo marayo hannaan wax soo iibsi oo furan kuna salaysan hufnaan taas oo ay kasoo qaybgeleen shirkadii furitaanka iyo qiimayntiisa korjoogayaal ka socda deeq bixiyayaasha iyo bulshada rayidka ah. Shirkadda ku guulaysatay qandaraaska waa inay ku keentaa nidaamka iyo qalabka 60 maalmood oo ka bilaabanaysa 1da Diseembar 2020.



HAWLAHA AAN QABSOOMIN

Caabuqad Covid-19 aawadiis, hawlo dhowr ah ayaan suurtagal noqon in la hirgeliyo sanadkii 2020. Hawlahaas ayaa yeelan mudnaanta ugu weyn sanadka 2021, GKDPL waxay durbaba ka shaqeynayaa qaar badan oo ka mid ah hawlahaas sida:

1. Uguurista dhismaha xafiiska dhexe lama gaarin sababo la xiriira dib-u-dhac ku yimid hawlaha diyaarinta dhismaha cusub
2. Soo iibinta qalabka xafiisyada iyo nidaamyadooda waxaa qeyb ahaan laga fuliyay saddexda (3) degmo ee loo asteeyey doorashooyinka hordhaca ah sabab la xiriirta caabuqa Covid-19 iyo dhaqaale yari
3. Isku-xirka safarrada aqoon kororsiga ayaan sidoo kale la hirgalin sababo la xiriira cudurka Covid-19 iyo xannibaadaha safarrada lasoo rogay ee galaftay isku socodka dalalka.
4. Soo-iibinta qalabka Kombuyuutarka iyo softiweerradiisa, iyo uxiritaanka khadka internatka ee xafiisyada dhexe ee degmooyinka sidoo kale ma hirgalin sababo la xiriira dhaqaale yari.
5. Hirgalinta siyaasadda kawada qaybgalka jinsiga lama samayn sababo la xiriira ku fillaansho la'aanta kharashka lagu shaqaaleynaayo la taliyayaal si ay u fuliyaan dib u eegista, horumarinta iyo hirgalinta siyaasada.
6. Sababo la xiriira caabuqa Covid-19 iyo maalgalin la'aan, laguma guulaysan asaasidda uqaabilsanaha GSI-ka ee xarunta dhexe ee xafiiska.
7. Kormeerka muddaysan ee muhiimka u ah Doorashooyinka Hordhaca ah ee Dowladaha Hoose looma sameynin sidii GKDPL u rabay sababo la xiriira ilaha dhaqaalaha iyo taagta Kormeerka iyo Qiimeynta (K&Q) ee lama huraanka ah oo yar. Isla qodobbadaas ayaa gundhig u ahaa in aan la gaarin asaasidda iyo tababaridda kooxaha kormeerka heer maamul, heer gobol iyo heer degmo si loola socda hirgalinta Doorashooyinka Dowladaha Hoose. Sidaa awgeed, howlaha Kormeerka iyo Qiimeynta ee GKDPL looma unkin sidii lafilaayey.
8. Qabashada doorashadii hordhaca ahayd ee 3da egmo oo iyadana dib u dhacday sababo la xiriira covid19 iyo dhaqaale yari.



CAQABADAHA

1. Bilowga cudurka faafa ee 'Covid-19' wuxuu keenay in inta badan howlahii uqorshaysnaa GKDPL ay adkaato in laqabto sababo laxiriira caqabado aan horay loo arag oo ay kamid yihiin xayiraadaha safarka, bandooga, karantiilka, kala fogeynta bulshada iyo talaabooyinka kale ee kahortaga ah ee nagu qasbay inaan muddo hakinno howlo badan oo muhiim ah. Tusaale ahaan: (i) dhammaystirka hawsha diiwaangelinta ee Ururrada Siyaasadda waxaa saameyn ku yeeshay Covid-19 waxaana waqtiga loo kordhiyay si loo siiyo waqti dheeri ah dhammaan ururada daneynaya inay isku diiwaan geliyaan waqtiga loogu talagalay.
2. Qiimaynta duruufaha dhaqan-siyaasadeed iyo aragtida bulshada ee hannaanka dimuqraadiyeynta ee degmooyinka Puntland halkaasoo doorashada goleyaasha deegaanka lagu qaban lahaa ayaa waxaa hakiyay xaddidaadda safarrada ee lasoo rogay si loo xakameeyo faafitaanka Covid-19 ee degmooyinka kala duwan ee Puntland. Hawlaha kale sida; la-falgalidda muwaadiniinta oo aan suurta galin taas oo looga baahnaa GKDPL inay si toos ah ula hadlaan bulshada una oggolaadaan inay si furan ula macaamilaan.
3. Intaa waxaa dheer, shirarkii isku-xirka daneeyayaasha ayaa sidoo kale hakad la galiyay usbuucyo maaddaama daneeyayaashu aysan si fudud u kulmi karin una qabsan karin doodahooda xaddidaadda Covid-19 awgeed. Kulammadaas waxaa lagu yeeshay habka casriga ah ee fogaan kulanka. Laakiin tani sidoo kale waxay keentay caqabad sababtoo ah dhammaan daneeyayaasha oo aan si fudud ku heli karin ama u adeegsan karin qaababkaas.
4. Isku soo wada duuboo, Covid-19 wuxuu carqaladeeyey hawlo dhawr ah oo ay GKDPL ugu tala galeen in lagu fuliyo sanadkii 2020 gudihiisa. Waxaa ka mid ah; ; horumarinta barnaamijka waxbaridda madaniga ah/waxbaridda cod-bixiyaha (CE/VE), hannaanka Kormeerka iyo Qiimaynta ee isku dhafan; sameynta barnaamijka waxbaridda cod bixiyayaasha ee dadka baahiyaha gaarka ah la nool; aagaynta xarumaha codbixinta iyo xarumaha diiwaangelinta; unkidda qorshaha qeybinta iyo dib u soo celinta agabka iyo qalabka doorashada; qorista, tababarka iyo dejinta shaqaalaha diiwaangelinta; qabashada diiwaangelinta codbixiyayaasha ee maamulka oo dhan iyo diyaarinta qorshaha hawl-galinta Doorashooyinka Dowladaha Hoose.



5. Maalgalinta oo yar awgeed ayaa hakad galisay qaar ka mid ah hawlaha muhiimka ah ee GKDPL taas oo keentay dib u dhac ku yimaada qaar ka mid ah hawl-qabadyadii GKDPL ee ku caddaa qorshaha istaraatiga ah iyo Tubta Doorashooyinka. Tusaale ahaan, qoondada miisaaniyadeed ee ka timid dawlada iyo bahwadaagta deeqda bixiya awgeed, GKDPL ma awoodin inay soo iibsado qalabka xafiisyada iyo nidaamyada dhamaan degmooyinka ay ka dhacayso doorashooyinka hordhaca ah, inay soo iibsato agabka isgaarsiinta teknooloojiyadda (ICT), softiweerka qalabka kombuyuutarka iyo isku xirka xafiisyada degmooyinka ee xarrumaha dhexe ee gobollada iyo horumarinta iyo hirgalinta siyaasadda kawada qaybgalka jinsiga.
6. Bilowgii doorashada federaalku waxay dhalisay weecasho iyo isbarbaryaac ku yimid geeddi-socodka doorashooyinka Puntland iyadoo dareenka muwaadiniinta iyo mas'uuliyiinta dawladduba u weecday Doorashooyinka Dawladda Federaalka. Danta siyaasadeed ee laga leeyahay doorashada ayaa sidoo kale u weecatay howlaha ka socda heer qaran. Arrintaasi waxay keensatay in dib loo qaabeeyo hawlqabadyadii GKDPL si fursad loo siiyo doorashooyinka heer qaran.

NATIJOOYINKA UGU MUHIMSANAA 2020

1. La-falgalka muwaadiniinta

GKDPL waxuu qirsan yahay doorka muhiimka ah ee ay muwaadiniintu ka qaateen kaqaybgalka siyaasadeed ee xulashada iyo ansaxinta hogaamiyayaashooda matalaya una adeegidoona. Hawlaha siyaasadeed ee GKDPL waxaa ka mid ahaa in xubnaha guddigu ay si toos ah ula hadleen muwaadiniinta una oggolaadeen inay si furan ula wadaagaan cabashooyinkooda, fikradahooda iyo soo jeedintooda ku wajahan tubta GKDPL ay u bilaabayso geeddi-socodka dimuqraadiyadda Puntland ee ku wajahan doorashooyinka dawlada hoose ee 2021. Sidaa awgeed, booqashooyinkii heer gobol iyo degmo, GKDPL waxay awood u yeesheen inay si toos ah ula shaqeeyaan 25,000 qof oo ka kala yimid 16 degmo. Sidaa awgeed, GKDPL waxay sidoo kale awood u yeesheen inay si dadban ula shaqeeyso in ka badan 300,000 oo muwaadiniin ah iyada oo loo marayo baraha bulshada iyo farriimo diyaarsan lala wadaagay muwaadiniinta.



2. Aqoonta codbixiyayaasha oo korortay

Aqoonta muwaadiniinta ee hannaanka doorashooyinka Puntland iyo doorashooyinka dowladaha hoose ayaa kor loo qaaday. Booqashooyinkii gobollada iyo degmooyinka, GKDPL waxay awood u yeeshen inay muwaadiniinta reer Puntland siiyaan macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan ka qaybgalkooda doorashooyinka soo socda si dhexdhexaad ah oo aan xaglin ku jirin. GKDPL waxuu fuliyay wacyigalinta codbixiyaasha iyadoo si dhow loola kaashanaayo daneeyayaasha ay kamid yihiin ururrada bulshada rayidka ah, bahwadaagta beesha caalamka, warbaahinta iyo laamaha korjoogteynta ee dawladda si loo xoojiyo qiyamka dimoqraadiyada loona kordhiyo waxbaridda codbixiyaasha. GKDPL waxuu faafiyay macluumaad, agabyo iyo barnaamijyo loogu talagalay in loogu wargaliyo codbixiyayaasha waxyaabaha gaarka ah iyo habraaca howlaha doorashada ee doorashooyinka dawladda hoose. Intaas waxaa sii dheer GKDPL waxuu baahiyey aqoonta nidaamka siyaasadeed iyo duruufaha Puntland. Muhiimadda waxbaridda cod-bixiyeyaashu waxay ahayd in la baro dadweynaha sida loo codeeyo balse ma aysan khusayn cidda la dooranayo. GKDPL waxuu muwaadiniinta siisay aqoon ku saabsan;

- (i) Cidda u qalanta in ay codayso
- (ii) Nooce doorasho ee laqaban doonaa
- (iii) Halka iyo habka ay isku diiwaangalin karaan si ay u codeeyaan
- (iv) habka ay u buuxinayaan waraaqaha codaynta
- (v) Habraaca doorashada

3. Aaminaaddii shacabka iyo kalsoonidoodii oo korortay

La shaqeynta muwaadiniinta iyo fulinta waxbarashada la xiriirta doorashooyinka, GKDPL waxuu awood u yeeshay inuu kalsooni ku aburo muwaadiniinta kuwaas oo qaabilaaddooda GKDPL iyo howlahoodu ay wanaagsaneyd sidoo kalena soodhoweeyey tubta doorashada ee lala wadaagay, Marka laga eego dhinacaas, GKDPL waxuu kasbaday kalsooni dheeri ah ee dhanka udiyaar garowga doorashooyinka dawladda hoose maadaama dhammaan waxqabadyadii qorshaysanaa ee lala wadaagay muwaadiniinta ay ka dhasheen fal-celin wanaagsan. GKDPL waxuu qirsan yahay in doorasho sharci ah ay tahay midda natiijada ka soo baxda ay ka tarjumeysa doorashooyinka xorta ah ee ay muujiyeen reer Puntland sidaa darteedna kor u qaadaysa kalsoonida guddiga, iyadoo doorashooyinka soo socdana ay aad muhiim ugu tahay xaqiijinta dimoqraadiyada sharciyaysan ee



Puntland lagana bilaabay doorashooyinka soo socda. Laakiin midda ugu muhiimsan, in la abuuro astaamo lagu kasbado kalsoonida doorashooyinka soo socda iyo aqbalaadda natiijoyinkeeda ayaa horudhac wanaagsan u ah dimuqraadiyadda sharciyaysan ee ka hirgali doonta Puntland.

4. Kor u qaadidda ka qayb galka Haweenka iyo Dhalinyarada

GKDPL waxay si gaar ah ula falgaleen haweenka iyo dhalinyarada si loo hubiyo kaqeybgalkooda ee geedi socodka. Kulammada waxbaridda iyo la-tashiga ee cod-bixiyeyaasha ee lagu qabtay heer degmo ayaa aad muhiim ugu ahaa kor u qaadista ka-qaybgalka haweenka iyo dhalinyarada ee doorashooyinka dawladdaha hoose ee soo socda. Arrintaasi waa mid si gaar ah muhiim ugu ah dal colaad kasoo kabanaya sida Soomaaliya oo haweenka iyo dhalinyarada aan la siin fursado furan si ay door firfircoon uga ciyaaraan maamulka arimahooda sidaa darteed GKDPL waxuu si buuxda u fahamsan yahay muhiimada ay leedahay in dhalinyarada iyo haweenka laga qeyb geliyo waxbaridda codbixiyaha iyo muwaadiniinta oo ay barbar socdaan raggu. Xogta codbixiyeyaasha ee la gudbiyay qaarkood waxay ahaayeen kuwa u dhug leh jinsiga oo loogu talagalay inay noqdaan kuwa khuseeya haweenka si ay gacan uga geystaan kor u qaadista ka qaybgalkooda doorashooyinka soo socda iyadoo la muujinayo sawirro wanaagsan oo haweenka ah sida iyagoo cod-bixiyeyaal ah, hoggaamiyeyaal ah, iyo ka-qaybgalayaal dhammaan dhinacyada geeddi-socodka dimuqraadiyadda Puntland.

5. Hagaagidda Isku-xirka Daneeyayaasha

Markii la aasaasay farsamooyinka isku-xirka daneeyayaasha, GKDPL waxuu awood u yeeshay inuu hagaajiyo isla-xiriirka u dhexeeya dhammaan daneeyayaasha dimoqraadiyadda ee maamulka, iyadoo markaa la hagaajinaayo wax-ku-oolnimada geeddi-socodka dimuqraadiyadda sida soo socota:

- (i) Isku-xirka ururrada bulshada rayidka ah iyo GKDPL ayaa lagu hagaajiyay kulamada joogtada ah. Ururada bulshada rayidka ah waxay fududeeyaan wada xiriirka u dhexeeya muwaadiniinta iyo siyaasad dejiyeyaasha isla markaana u ogolaadaan fursad ay ku samayn karaan u qareemid ayaa faa'iido u leh kor u qaadida geedi socodka dimuqraadiyada. Si loo hubiyo ficil iyo farriin isku duuban, GKDPL waxuu la-tashiyo bille ah la sameeyey si kor loogu qaado wacyigelinta bulshada, isla markaana loo



dhiirgaliyo hab-dhaqan dimoqraadi ah iyada oo loo maraayo waxbarashada asxaabta, baraarujinta dimuqraadiyadda iyo xuquuqaha.

- (ii) Isku-xirka Guddi-Hawleedka Golaha Wasiirrada iyo GKDPL oo aad loo xoojiyey. Dadaallada dimuqraadiyadaynta Puntland ayaa wajaha dhaqaala yari, sidaa darteedna waxuu guddigu ku baaqeyaa in la helo taageero dhinacyo badan leh oo lagu xoojinayo dadaalkooda lagu qabanaayo doorashooyinka dawladdaha hoose. Isku-xirkaa wax ku oolka ah ee u dhexeeya GKDPL iyo Guddi-Hawleedka Golaha Wasiirrada waa lama huraan si loo helo xalal si dhakhso leh loola socdo dimuqraadiyadda Puntland. Dhammaan isku-xirka GKDPL iyo daneeyayaasha ayaa la xoojiyay. Xaaladdaasi, GKDPL waxay u oggolaaneysaa inuu helo macluumaad la isku halleyn karo, dhiirrigelinta daahfurnaanta, kor u qaadista waxtarka hawlgalka iyo inuu siiyo jawaab celin iyo macluumaad dhammaan daneeyayaasha ay khuseyso. Sidaa darteed, GKDPL waxuu u isticmaalayaa shirarkan seddexdii biloodba lala yeelanaayo dhamaan daneeyayaasha si uu u asaaso una dhisaan xiriirka lala yeesho daneeyayaasha ay khuseyso taas oo sare u qaadeysa iskuxirka iyo kala faaiidaysashada bahwadaagta dhexdooda si la iskaga ilaaliyo ku celcelinta hawlaha iyo sidoo kale la socoshada iyo fududeynta hirgelinta ujeedooyinka istiraatiijiyadeed ee GKDPL iyada oo talooyin laga helayo dhamaan daneeyayaasha ay khuseyso.

6. Samaynta Dukumiintiyada kala duwan

Dhammaan hawlihii la qabtay awgood, GKDPL waxa uu awood u yeeshay in uu diyaariyo dukumiintiyada soo socda

- (i) **Qorshaha Hawlgalka ee Doorashooyinka Hordhaca ah:** kaas oo muujinaya faahfaahinta habraacyada iyo tilmaamaha la raaci doono marka la qorsheynayo, la diyaarinayo lana qabanayo doorashooyinka hordhaca ah ee saddexda degmo ee la asteeyay. Qorshuhu wuxuu kaloo qeexayaa astaamaha loo adeegsan doono in lagu xusho saddexdaas degmo ee hordhaca ah halkaasoo doorashada hordhaca ah ay ka dhici doonto
- (ii) **Kala-xulashooyinka Diiwaangelinta Cod-bixiyeyaasha:** dokumentigani wuxuu sharxayaa tilmaamaha ay cod-bixiyeyaashu raaci doonaan marka ay is-



diiwaangelinayaan saddexda doorasho ee soo socota. Waxuu bixinayaa macluumaad ay cod-bixiyeyaashu u baahan karaan markay doortaan inay is-diiwaangeliyaan si ay uga qaybqaataan doorashooyinka dawlada hoose sannadka 2021.

- (iii) **Miisaaniyadda Doorashooyinka Hordhaca ah:** waa miisaaniyadda lagu kharash gareeyay fududaynta qabashada doorashada ugu horreysa ee xorta iyo xalaal ah ee saddexda degmo ee hordhaca ah si loogu diyaar garoobo doorashooyinka dowladda hoose ee 2021

7. Karaanka Degmooyinka oo laqiimeeyey

GKDPL waxuu awood u yeeshay inuu qiimeeyo duruufaha dhaqan-siyaasadeed iyo aragtida bulshada ee dimuqraadiyeynta mid kasta oo ka mid ah 16-ka degmo ee la booqday taasoo ka caawin doonta hirgelinta doorashooyinka Golayaasha Deegaanka oo hufan. Intii lagu guda jiray qiimeynta, waxaa jiray caqabado dhowr ah oo ugu mug weynaa iyo guulo la ogaaday oo ka caawin karta GKDPL diyaarinta doorashooyin lagu kalsoonaan karo. Intaas waxaa sii dheer, qaar ka mid ah macluumaadka la soo uruuriyay waxaa lala wadaagi doonaa Hay'adaha kale ee Dawladda ee u xilsaaran wax ka qabashada caqabadaha laga helay degmooyinkaas tusaale ahaan; arrimaha amniga, kiisaska isku dhaca, bixinta iyo helitaanka adeeg ku filan gaar ahaan dhanka kaabayaasha isku socod. Awood la'aanta howl qabad ee ka jirta degmooyinka qaar ayaa u baahan in wax laga qabto si jawi wanaagsan loo helo oo muwaadiniinta u oggolaanaya inay si xor ah codkooda u dhiibtaan. Sidaa awgeed abuurista awoodda hawlgalnimada waxaa loo arkay inay shardi u tahay dimuqraadiyeynta wax ku oolka ah ee Puntland gaar ahaan iyadoo loo diyaar garoobayo doorashadii ugu horreysay ee toos ah ee ka dhacda Puntland.

8. Dhameystirka kala xadaynta deegaan doorashooyinka loo asteeyay inay ka dhacaan doorashooyinka hordhaca ah

Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta Puntland ayaa dhameystirtay kala xadaynta deegaan doorashooyinka degmooyinka Qardho, Eyl iyo Uffeyn waxayna u gudbisay warbixintooda GKDPL . Guddigu wuxuu dhameystiri doontaa qiimeynta lagu xulan doono xuduud doorashooyinka bisha Janaayo 2021. si waafaqsan qorshaha istiraatiijiyadeed qodobkiisa 6aad, xuduudaha deegaan doorashooyinka ayaa la xadiday ayadoo la tixraacayo



Dastuurka, GKDPL asagoo og in xadaynta xuduudaha degaan doorashooyinku ay tahay masuuliyadda xukuumadda si waafaqsan Dastuurka Puntland qodobkiisa 120aad, faqradiisa 3aad, wuxuu fududeeyay kulamo wadatashi ah oo lala yeeshay wasaaradaha ay khuseyso si loo soo saaro hagayaasha lagu dhammaystirayo dib-u-eegista socota ee xadeynta degmooyinka si loo xadido xarumaha cod-bixinta ee Doorashooyinka Dawladaha Hosse.

9. ku dhawaaqidda iyo shahaado siinta Ururada Siyaasadda

ayadoo la raacayo hanaanka hubinta Urur Siyaasadeedyada, 1 august 2020 GKDPL waxa uu ku dhawaaqay in 10 urur siyaadadeed ay buuxiyeen shuruudihii sharci ee looga baahnaa si loo diiwaan-geliyo. 10-ka Urur siyaasadeed waxaa shahaadooyinka lagu guddoonsiiyay xaflad rasmi ah oo uu soo qabanqaabiyay GKDPL laguna qabtay magaalada Garowe 15 August 2020. Xafladda waxaa kasoo qaybgalay madaxwayne ku xigeenka Dawladda Puntland Mudane Axmad Cilmi Cismaan iyo laba madaxwayne hore oo Puntland ah, Madaxwayne Cabdiwali Cali Gaas iyo Madaxwayne Cabdiraxmaan Maxamad Faroole. sidoo kale, xafladda waxaa kasoo qaybgalay wakiilada Ururada Siyaasadda, xubno katirsan Golaha Wakiilada, Golaha Wasiirada iyo Ururada Bulshada Rayidka ah. kadib khudbado ay jeediyeen dhammaan Ururada Siyaasadda, Guddoomiyaha GKDPL ayaan guddoonsiiyay Ururada shahaadooyinka aqoonsiga Ururnimo. Ururada siyaasadeed ee soo socda ayaa hadda si rasmi ah u diiwaan-gashan:

1. Urur Siyaasadeedka Runta iyo Cadaaladda
2. Urur Siyaasadeedka Shaqaalaha
3. Urur Siyaasadeedka Dhalinyarada
4. Urur Siyaasadeedka Cadaaladda iyo Sinaanta
5. Urur Siyaasadeedka Kaah
6. Urur Siyaasadeedka Mideeye
7. Urur Siyaasadeedka Mustaqbal
8. Urur Siyaasadeedka Himilo
9. Urur Siyaasadeedka Horseed
10. Urur Siyaasadeedka Ifiye



HAWLQABADYADA QORSHAYSAN 2021

Iyadoo la raacayo Qorshaha Istaratiijiyadeed iyo Tubta Doorashooyinka Dawladaha Hoose, GKDPL waxuu hirgelin doonaa howlaha soo socda ee qorshaysan sanadka 2021:


Shaqooyinka ugu waawayn ee 2021
1. In lasii wado la falgalka muwaadiniinta iyo waxbaridda cod-bixiyayaasha
2. Dhameystirka sohdimaha deegaan doorashooyinka
3. Ansixinta hindise sharciyeedka diiwaangelinta codbixiyaha iyo horumarinta qaab dhismeedka siyaasadaha iyo habraacyada doorashada
4. Sahan lagu samaynayo seejooyinka iyo goobaha diiwaangelinta codbixiyayaasha
5. Dhammaystirka iyo daahfurka buugga wacyigelinta codbixiyaha
6. Soo iibinta qalabka iyo agabka doorashada
7. Bilaabidda iyo dhammaystirka hawsha diiwaangelinta codbixiyayaasha
8. Dhameystirka iyo qabashada doorashooyinka hordhaca ee 3-da degmo
9. Furista dhammaan xafiisyada heer gobol iyo degmo ee Guddiga
10. Tababarida iyo kor u qaadista aqoonta bahwadaagta doorashada sida ururada bulshada, ururada siyaasadda, warbaahinta IWM
11. Abaabulka, kormeerka iyo ka warbixinta natiijooyinka doorashooyinka dawladaha hoose
12. Qabashada doorashooyinka guud ee golayaasha deegaanka



"Your Vote, Your Right, Your Future"



BAHWADAAGTA GKDPL



Embassy of Switzerland




Puntland
Development &
Research Center



GUNAANAD MAALIYADEEDKA

1. Dakhliga


Ilaha Dhaqaale	Qaddarka (\$)
Dawladda	\$254,877
Sahan/Swiss/Danish	\$238,000
Interpeace/Sweden	\$16,490
Lacagaha Diiwaan-gelinta	\$44,590
Wadarta Dakhliga	\$554,016.76





2. Kharashaadka

Kharashaadka Baxay			Qadarka (\$)
Mushaharaadka, Habeen-dhaxa	iy	o	\$238,184
Mushqaayadaha			
Kharashaadka Xafiiska			\$94,372.24
Amniga			\$9,600
Qalabka			\$119,676
Kulamada iyo Tababarada			\$27,875
Kharashaad Nooli			\$25,160
Warbaahidnta			\$35,080
Kharashaadka kale			\$4,069
Wadarta Kharashaadka			\$554,016.24



SAWIRADA GKDPL



Sawirka 1: GKDPL oo la hadlaya Saxaafadda



Sawirka 2: GKDPL oo Hubinaya Ururada Siyaasadda



Sawiradda 3: Ururada Siyaasadda ee GKDPL Ansixiyay



Guddiga 4: Ururada Siyaasadda ee GKDPL Ansixiyay



Sawirka 5: Lakulanka GKDPL ee Deeqbixiyayaasha



Sawirka 6: La-kulanka GKDPL ee Ururada Bulshada Rayidka ah



Sawirka 7: Qaar kamid ah gabdhaha da'da yar ee kasoo qaybgalay kulamada GKDPL.



Sawirka 8: Guddoomiyaha GKDPL oo la kulmay qaar kamid ah daneeyayaasha geedi socodka Diimuqraadiyanta Puntland



Sawirka 9: Xubnaha Guddiga oo la hadlaaya qayb ka mid ah bulshada inta ay ku guda jireen booqashooyinkii Degmado.



Sawirka 10: Hablaha yar yar ayaa si gaar ah loogu dhiirigaliyey in ay ka qaybgalaan ololaha waxbarashada codbixiyayaasha



Sawirka 11: Haweenka ayaa bartilmaameed u ahaa ololaha waxbaridda codbixiyayaasha hannaanka dimuquraadiyadaynta Puntland.



Sawirka 12: Qaybo ka mid ah bulshada oo lala yeeshay kulamo tashi ah oo ku saabsan astaynta 3-da Ddegmo ee doorashooyinka hordhaca ah




Sawirka 13: ka qaybgalinta haween ka iyo dhalinyarada ee ololaha waxbaridda codbixiyayaasha mudnaan goonni ah ayuu u leeyahay GKDPL



Sawirka 14: La-falgalidda muwaadiniinta ee booqashooyinta Guddiga ayaa si gaar ah diiradda loogu saaray macluumaadka iyo agabka codbixiyayaasha intii lagu guda jiray kulammadii wada tashiga ahaa



"Your Vote, Your Right, Your Future"



Vision

Promotion of accountable local governance through credible and transparent local government election (LGE)

Mission

To conduct the LGE that promotes and safeguards the democratic aspirations of the citizens (or Puntland people)

For more information, please contact:

Name of the Institution: Transitional Puntland Electoral Commission (TPEC)

Website: www.tpec.pl.so

Email: tpec@tpec.pl.so

Facebook: Transitional Puntland Electoral Commission

Twitter: @TPECpuntland

Address: Main Tarmac Road, Opposite PDRC, Waberi Garowe